



## XEERARKA XASILLOONIDA GURYAHA ee guryaha kirada ah ee degmada

Dhammaan dadka deggan guri ay degmadu leedahay waxaa looga baahan yahay in ay gacan ka geystaan sidii ay bey'adda degaanku u noqon lahayd mid wanaagsan. Marka uu guri kuu kireysan yahay adiga ayaa martidaada mas'uul ka ah.

### 1. Xasillooni guud iyo ammaan

- a. Waxaa loo baahan yahay in ay guriga gudihiisa iyo dibaddiisaba xasillooni iyo nidaam ka jiraan inta u dhexaysa saacadaha 23.00 iyo 07.00. Maalinta inteeda kale xataa waa in uu qofku deriskiisa tixgeliyaa.
- b. Albaabka hore iyo midka qolalka hoose (kjeller) iyo kan qolalka kore (loft) waa in ay had iyo jeer xirnaadaan.

### 2. Guriga

- a. Marka aad tahay kireyste waxaa waajib kugu ah in aad guriga nadiifiso oo aad ilaaliso. Waxaa sidoo kale waajib kugu ah in aad isla markiiba soo sheegto haddii uu guriga dhaawac soo gaaro ama aad ku aragto xayawaanka waxyeellooyinka geysta (skadedyrr).
- b. Musquusha waxaa lagu ridaya waraaqaha musquusha oo keliya. Adiga ayaa mas'uul ka ah in dulleellada ay biyuhu ka baxaan in ay furan yihiin oo aad musquusha furto haddii ay xiranto.
- c. Si looga hortago qoyaan iyo dhaawacyo uu bolol keenay (soppskader) waa in guriga si joogto ah loo layriyo, duldulellada yaryar ee uu gurigu hawada ka qaatana ay had iyo jeer furnaadaan. Arrintani waxay khusaysaa sanadka oo idil. Marka aad cunto karinayso, waa in ay marawaxadda khushiinku had iyo jeer daarnaataa.
- d. Lama oggola in guriga dibaddiisa anteennooyin lagu rakibo.
- e. Lama oggola in kaddiifado ama roogag laga hurgufo balkoonnada ama daaqadaha.
- f. Lama oggola in shimbiraha gurigaaga cunto lagu siyo.
- g. Adiga ayaa lagaa rabaa in aad sanadkiiba ugu yaraan hal mar beddesho batariga qalabka dabka ka diga (brannvarsler), islamarkaana aad geddiso oo madaxiisa hoos u rogto qalabka dabka lagu demiyo.

### 3. Aagga dadka ka dhexeeyaa

- a. Waxyaalahu uu qofku gaarka u leeyahay waa in uu qofku dhigtaa gurigiisa ama maqaasiinkiisa. Waxyaalahu qofku gaarka u leeyahay ee la dhigo aagga dadka ka dhexeeyaa mulkiilaha guriga ayaa meesha ka qaadi kara isaga oo aan wax digniin ah bixin.
- b. Gaari ama gaadiid kale oo aan taariko lahayn (aan diiwaangashanayn) lama dhigi karo guriga degmada.
- c. Kireystayaasha oo idil waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan xeerarka kala soocidda qashinka guryaha ee u yaalla degmada Trondheim. Waxyaalahu qofku gaarka u leeyahay iyo qashinka marna lama oggola in la dhigo meel ka baxsan kontaynarrada degmada. Waxyaalahu gaarka loo leeyahay ee waaweyn waa in uu qofku geeyaa meesha qashinka lagu tuuro.

### 4. Haysashada xayawaanka

- a. Laba xayawaan sida eey iyo bisad caadi ahaan waa la oggol yahay. Haddii ay xayawaanka deriska dhibaan ama ay guriga dhaawacaan, waxay degmada Trondheim oo ah mulkiilaha guriga kaa codsan kartaa in aad joojiso in aad xayawaankaas guriga ku sii haysato.

### 5. Xeerarka xasilloonida guryaha oo la jebiyo

- a. Xeerarka xasilloonida guryuhu waa qayb ka mid ah heshiiska kirada guriga. Xeerarka oo la jebiyo waxaa loo arkaya heshiiskii kirada guriga oo lagu xadgudbay taas oo kuu soo jiidi karta in uu magdhaw waajib kugu noqdo, in guriga lagaa saaro ama in laga baxo heshiiskii kirada guriga.

### 6. Cabashada aagga degaanka

- a. Haddii uu deriskaagu jebiyo xeerarka xasilloonida guryaha ama uu dhib kugu hayo, cabasho qoraal ah u soo dir degmada Trondheim. Cabashada waxaad ku soo gudbin kartaa foomka internetka ku jira ee «Klage på bomiljø», adiga oo foomka ku soo diraya iimaylka bomiljo@trondheim.kommune.no ama warqad ku soo qor.